Ma u baahan tahay inaad u soo gudbiso Dukumiintiyo SNAP?

Waa kuwan siyaabaha ugu fudud ee aad ku diri karto dukumiintiyada xaqiijinta oo aad ku ilaalin karto codsigaaga SNAP.

Waqtiga badbaadso. Ku soo dir dokumiintiyadaada onleenka!

Isticmaal Bogga Macaamiisha ee One DHS si aad sawirrada ama faylasha dukumentiyadaada ugu soo geliso. Waxaad:

- Codsan kartaa dheefaha
- Maamuli kartaa galkaaga
- Soo gelin kartaa dukumiintiyadaada xaqiijinta
- Dib u eegi kartaa ogeysiisyada
- Iska diiwaangelin kartaa farriimaha qoraalka ah
- Heli kartaa xusuusinno iyo cusboonaysiinno

Visit: https://onedhs.tn.gov/csp

Waxaad Sidoo Klae Isticmaal kartaa Sanduuqa Wax Lagu Rido ee Yaala Gudaha Xafiiska Deegaankaaga

TSanduuqa wax lagu rido waxa laga yaabaa inuu yaalo meel ka baxsan dhismaha, ama goobta dhismaha. Raadi calaamad ay ku qoran tahay Drop Box. **Kaliya kaga tag nuqulo. Hayso dukumiintiyadaada asalka ah. Ku qor magacaaga iyo lambarkaaga kiiska bog kasta.**

Soo gudbi dukumiintiyo sax ah oo xogtoodu cusub tahay.

Waxaan dukumiintiyadaada u isticmaalnaa inaan ku xaqiijinno macluumaadka aad ku bixisay codsigaaga iyo wareysigaaga. Hubi in dukumiintiyada aad soo gudbinayso ay waafaqaan macluumaadka aad noo sheegtay.

Xogtaada Cusboonaysii

Marka aad hesho SNAP, waxaa laga yaabaa inaad TDHS u soo sheegto isbeddello gaar ah. Akhri ogeysiisyada laguu soo diro si aad u ogaato isbeddellada ay tahay inaad soo sheegto iyo waqtiga aad soo sheegaysid.

Waxa La Soo Gelinayo

Si aad u hesho dheefaha SNAP, waa inaad soo gudbisaa dukumiintiyo xaqiijin ah. Dukumiintiyadani waxay muujiyaan aqoonsigaaga, halka aad ku nooshahay, dakhligaaga iyo kharashaadka qoyskaaga. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah, balse aan ku koobnayn:

Cadeyn	Tusaale(yin)
Lambarka Sooshiyaal Sekuuritiga	Kaarka Sooshiyaal Sekuuritiga
Aqoonsi	• Shatiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga Gobolka • Kaarka aqoonsiga dugsiga ama shaqada • Kaarka aqoonsiga caymiska caafimaadka • Baasaboorka • Kaarka diiwaangelinta codbixiyaha
Deegaanka (Halkaad ku Nooshahay)	• Shatiga darawalnimada • Biilasha adeegyada guriga (sida korontada, gaaska ama biyaha) • Rasiidhada kirada ama amaahda guriga oo muujinaya cinwaanka • Boostada laguu soo diro cinwaanka la sheegay • Kaarka maktabadda oo muujinaya cinwaanka • Kaarka diiwaangelinta codbixiyaha
Kharashaadka Adeegyada Guriga	Biilka korontada, biilka biyaha, biilka gaaska
Kharashaadka Hoyga	Warqadda amaahda guriga ama rasiidhka kirada, canshuurta hantida, caymiska mulkiilaha guriga.

Cadeyn	Tusaale(yin)
Xaalada Socdaalka	• Dukumiintiyada socdaalka iyo jinsiyadda (Looma baahna haddii aad tahay muwaadin Maraykan ah ama aad tahay “qof aan ka mid ahayn codsadayaasha”.)
Dhakhli	• Warqadaha mushaharka ee 30-kii maalmood ee la soo dhaafay • Qoraalka loo-shaqeeyaha (haddii lacag caddaan ah lagu siiyo ama aadan haysan warqadaha mushaharka) • Qaansheegyada ama rasiidhada shaqo-iskaa-u-shaqaysiga (waxaa ku jira dakhliga kirada iyo shaqada madaxbannaan ama qandaraaska) • Dukumiintiyada lacag-bixinta Sooshiyaal Sekuuritiga • Dheefaha kale ee hawlgabka ama lacagta hawlgabka • Masruufka xaaska • Heshiiska masruufka ilmaha • Dheefaha shaqo-la’aanta
Xaalada Socdaalka	• Qoraallada bangiga ee xisaabaadka jeegagga iyo kaydka • Saamiyada shirkadaha, lacagta damiinashada iyo/ama shahaadooyinka dhigaalka (CDs) • Caddeynta lahaanshaha guryaha la kireeyo • Dukumiintiyada lahaanshaha gaadiidka aan qoyska loo adeegsan iyo gaadiidka madadaalada • Dukumiintiyada lahaanshaha gaadiidka (Families First oo keliya)

Ku soo gudbinta dukumiintiyadan 10 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta aad codsiga gudbisay waxay ka caawinaysaa in hawsha codsigaaga si dhakhso ah loo dardargeliyo. Inta lagu jiro wareysigaaga u-qalmitaanka, waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad bixiso macluumaad dheeraad ah.

Ma u baahan tahay faahfaahin dheeraad ah?

Visit: https://www.tn.gov/humanservices/for-families/supplemental -nutrition-assistance-program-snap.html

SNAP Putting Healthy Food Within Reach
USDA Supplemental Nutrition Assistance Program

TN Department of Human Services